


Dareenyada kaankaroyaalka ugu badan ee dumarka

NAASAHA

- Bur adag naasaha dhexdooda ama kilkilaha hoostooda
- Bar guduudan ama fin ka soobaxo naaska maqaarkiisa
- Buruqda naaska oo isbadaleyso (cabirkeeda, kalarkeeda) ama dheecaan ka da'aayo
- Cabirka labada naas oo kala weynaanaayo

MIDHICIRKA HOOSE

- Dhiig saxarada gaduudinaayo ama madoobeynaayo
- Saxaro qabasho been ah
- Isbadalo xaga saxarada mid adag iyo ama shuban (isku dhaadhaafayo mid ku dhagan iyo shuban)
- Calool xanuun joogto ah



SAMBABADA

- Qunfac joogto ah mudo 4 todobaad ah
- Qunfac soo noqnoqda oo sii darsanaayo
- Infakshin sambabada oo aan antibiyootik ku reysaneyn
- Candhuuf dhiig leh
- Neef sashada oo si aan caadi aheyn u dhibto marka jaranjarada la koraayo
- Xabad xanuun

Hadii aad isku aragtid mid ka mid ah dareenadaan, micnaheedu ma aha in aad kaankaro qabtid. Balan ka qaado dhaqtar si la guu baaro.

MAQAARKA

bar caadi ah



bar in la baaro ah



qaab isla eg?



wareeg kooban?



midab isku eg?



Isbadal faahfaahsan? qaabka? midabka? balaca?

Waxa maalin walbo caafimaadkaaga u sameyn kartid:



Soco ugu yaraan 30 daqiiqo



Cun 5 muro iyo khudaar



Ku ekee qamriga 1 bakeeri



Iska badbaadi qoraxda



Sigaarka iska ilaali

Baaritaanka in la qabo kaankarada ku dhacdo naasaha



Waxaan jiraa 50 sano ama kabadan ama waxaan doorankaraa in aan is baaro.



Waxaan wacaayaa ururka baaritanka kaankarada ee gobalka Vaud (0848 990 990) oo balan i siinaayo si raajada naasaha leygaaga qaado meel u dhow gurigeeyga.



Waxaa todobaad kadib boostada la iigu soo dirayaa jawaabti:

- Haddii raajada naasaha ay caadi tahay, waxaa la'iisoo dirayaa warqad aan isku baaro 2 sano kadib.
- Haddii baaritaanka lagu arko jiro, waxaan wacaayaa dhaqtarkeyga qoyska oo ii diri doono baaritaan dheeri ah. Haddii aanan dhaqtar aqoonin, Ururka baaritaanka kaankarada ee gobolka Vaud ayaa ila soo xiriiraayo.



Waxey iigu kaceysaa 20 fr. sameyta baaritaankaan. Ceymiska caafimaadka ayaa inta kale bixinaayo.

Baaritaanka in la qabo kaankarada ku dhacdo mindhicirka hoose



Waxaan jiraa 50 sano ama waxaan doortay in aan is baaro.



Foom ayaan la buuxinaayaa shaqaale aqoon u leh caafimaadka kadibna waxaa la iisoo dirayaa baaritaan saxarada dhiig laga fiirinaayo.



Aniga ayaa saxarada iska qaadaayo aqalka kadibna waxaan sheybaarka ugu dirayaa baqshadii la'iisoo diray.



Waxaa todobaad kadib boostada la'iigu soo dirayaa jawaabti:

- Haddii baaritaanka uu caadi yahay, waxaa la'iisoo dirayaa warqad aan isku baaro 2 sano kadib.
- Haddii baaritaanka dhiig lagu arko saxaradeyda, waxaan wacaayaa dhaqtarkeyga qoyska oo ii diri doono baaritaan dheeri ah (coloscopie*). Haddii aanan dhaqtar aqoonin, Ururka baaritaanka kaankarada ee gobolka Vaud ayaa ila soo xiriiraayo.



Waxey iigu kaceysaa 5fr. sameyta baaritaankaan. Ceymiska caafimaadka ayaa inta kale bixinaayo.

*Coloscopie baaritaanka muqaalka gudaha waxaa loo doorankaraa baaritaanka kowaad ee kaankarada mindhicirka hoose ku dhacdo.

Waxaa qabaa su'aal?
Waxaan ka wacaayaa ururka
baaritaanka kaankarada
ee gobalka Vaud

 0848 990 990



Somali



Kaankaro la arkey inta uu cusub
yahay waxey kordhineysaa
fursada ka reysashadiisa